

Qorshaha hawlgaleed ee SACU

Kan ku akhri: [English](#) | [Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [Русский](#) | [简体中文](#) | [Soomaali](#) | [اللغة العربية](#)

Taariikhda: Sebtembar 28, 2026

Ku socoto: Xubnaha Bulshada Qabta Naafanimada Garaadka iyo Korriinka (I/DD)

Ka socoto: Acacia McGuire Anderson, Agaasimaha Ku-meelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS), iyo Winston Brown, Agaasimaha ah ee Qaybta Xasilinta iyo Dhibaatooyinka (SACU)

Salaan,

Waxaanu ka haynaa wacaal Qorshaha hawlgaleed ee Cutubka Xasilinta iyo Dhibaatooyinka (SACU). Warkan waxaa loogu talagalay bulshada oo dhan. Wuxuu aad ugu sii muhiimsan yahay:

- Shakhsiyaadka ay u adeegto SACU iyo qoysaskooda
- Shaqaalaha SACU iyo shurakada ururada shaqaalaha
- Hay'adaha maareynta kiiska (CME-yada)

- Qof walbo oo qabo su'aalo ku saabsan SACU

Waa maxay sababta SACU u samaynayso qorshe hawlgaleed oo cusub?

Waaxda Sharci-dejinta Oregon ayaa ansixisay Hindise-sharciyeed Maajo 2025. Sharcigu wuxuu na faray inaan bulshada la shaqayno si aan SACU ugu samayno qorshe hawleed cusub oo:

- Raacaya xeerarka fadaraalka ee adeegyada ku salaysan guriga iyo bulshada, iyadoo ujeeddadu tahay in la gaaro lana joogteeyo u hoggaansanaan buuxda
- Hagaajinaya daryeelka dhibaatooyinka si dadka looga caawiyo inay xasillooni ku gaaraan waqti ka yar
- Taageeraya dadka si ay si guul leh ugu laabtaan bulshooyinkooda
- Leh wejiyo kala duwan, iyadoo wejiga koowaad uu bilaabanayo Luulyo 1, 2027.

Hindise-sharciyeedku wuxuu nagu faray inaan dhammaystirno qorshaha oo aan u gudbinno Guddiga Wadajirka ah ee Ku-meelgaarka ah ee Ways and Means ugu dambayn Sibtambar 30, 2026.

Maxaa cusub tan iyo warbixintii u dambaysay ee ku saabsan qorshaha SACU?

Wacyigelinta iyo jawaabcelinta

Dayrtii hore, waxaan qabannay kulamo dhageysi oo ka dhacay gobollada ay ku yaallaan guryaha SACU. Waxaan ka maqalnay dadka deggan SACU, dadka naftooda u dooda, xubnaha qoysaska, shaqaalaha iyo bixiyayaasha taageerada, shaqaalaha maareynta kiisaska, xubnaha ururrada shaqaalaha, iyo deriska. Waad mahadsan tihiin, dhammaan intii timid ee nala wadaagtay fikradaha.

Mid ka mid ah mawduucyada ugu waaweyn ee aan maqalnay wuxuu ahaa in dadka deggan SACU ay waajib tahay inay si toos ah uga qaybqaataan samaynta qorshaha cusub. Sidaas darteed, horraantii sanadkan, kooxdayada hoggaanku waxay booqatay guri kasta oo SACU ah. Waxaannu la hadalnay degganayaasha iyo shaqaalaha. Waxaan maqalnay baahidooda, cabsidooda, welwelkooda iyo rajadooda. Waxaan maqalnay waxa u shaqaynaya iyo waxa aan u shaqaynayn. Jawaab-celintani waxay gacan ka gaysatay qaabaynta qorshaha cusub.

Jawaab-celintii aan ka helnay shurakadeenna ayaa iyaduna wax badan naga caawisay. Waxaan la shaqaynaynay shurakada si aan u eegno sida SACU u shaqayso, u fahanno meelaha adeegyadu gaabiska ka yihiin, oo aan u helno habab wanaagsan oo lagu taageero dadka ku jira dhibaatooyinka si ay ugu laabtaan bulshooyinkooda.

Kuwani waa qaar ka mid ah mawduucyada ugu waawayn ee ka soo baxay jawaab-celintan, kuwaas oo hagayay shaqadeenna:

- SACU waa shabakad badbaado oo lama huraan ah. Waxay buuxisaa gaabiska nidaamka ka jira marka adeegyada kale aysan si ammaan ah u dabooli karin baahiyaha dadka ku jira dhibaatooyinka. Waxa waajib ah inaan xoojinno doorka SACU ee adeegga xasilinta dhibaatooyinka.
- Xasilinta dadku waa ku kala duwan yihiin. Ma jiro waqti cayiman oo qof walba ku habboon inuu SACU joogo. Waxa waajib ah in adeegyadeena iyo qorshaheenu ahaadaan qaar dabacsan. Marka dadku dhakhso uga baxaan SACU, waxay halis ugu jiraan inay dhibaatada ku laabtaan. Waxaynu u baahannahay shuruudo galitaan iyo kala-guur oo cad-cad.
- Daryeelka caafimaadka dhimir iyo habdhaqan ayaa muhiim u ah xasilinta. Iskaashiyada nidaamyadu waa lama huraan. Waxa waajib ah inaan xoojinno wada-shaqayntena Maamulka Caafimaadka Oregon si aan si wanaagsan ugu taageerno dadka jooga SACU.
- Helitaanka adeegyadeenna waa inuusan ku xirnaan meesha uu qofku ku nool yahay. SACU waxay ku taallaa Willamette Valley oo kaliya. Qorshaheenu waa inuu caawiyo dadka ku nool gobolka oo dhan.
- U hoggaansanaanta xeerarka fadaraalku waxay ku saabsan tahay xuquuqda iyo karaamada dadka, mana aha in laga takhaluso badbaadada. Isbeddel kasta oo lagu sameeyo habraacyadeenna waa in loo sameeyaa qaab taageeraya badbaadada iyo xasiloonida qof kasta.
- Si dadku si guul leh ugu gudbaan dib ugu laabashada bulshada, shaqaalaha iyo shurakadeenu waxa waajib ah inay mas'uuliyadaha

wadaagaan. Taageerada maareynta kiisku waxa waajib ah inay ahaato mid joogto ah marka qofku joogo SACU iyo inta lagu jiro dib ugu laabashadiisa bulshada. Bixiyayaashu waxay u baahan yihiin taageero iyo tababar si dib-u-laabashadu u guulaysato.

Marka aan hore u sii soconno, waxaan sii wadi doonnaa inaan la shaqayno shakhsiyaadka, qoysaska, shaqaalaha, xoogsatada iyo shurakadeena. Jawaab-celintiinnu waxay lama huraan u tahay hawshayada.

Qandaraasleyaasha iyo dejinta qorshaha

Waxaannu shaqaalaynay laba qandaraasle si ay uga shaqeeyaan qorshaha: [Weaver](#) iyo [Illuminative Strategies \(ISI\)](#). Waxay khubaro ku yihiin adeegyada ku salaysan guriga iyo bulshada, Medicaid, iyo wax-ka-qabashada dhibaatooyinka. Waxay la kulmayeen dadka, dadka naftooda u dooda, xubnaha ururrada shaqaalaha, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta sharciga ah, shurakada bulshada, bixiyayaasha, hay'adaha maareynta kiisaska, iyo shaqaalaha.

Waxaan ISI kala shaqaynaynay hagaajinta u hoggaansanaantayada jaangoynaha fadaraalka ee adeegyada ku salaysan guriga iyo bulshada. ISI waxay la shaqaynaysay shaqaalaha iyo hay'adaha maareynta kiisaska si ay u sawirto oo u diiwaangeliso habraacyadeenna. Waxay dib u eegayaan xogtan iyo siyaasadeheenna si ay u ogaadaan sida aan u hagaajin karno adeegyadeenna annagoo buuxinayna shuruudaha fadaraalka.

Weaver waa la-taliye madaxbannaan. Tani waxay ka dhigan tahay inay iyagu samaystaan cilmi-baaristooda oo ay shaqadooda si madax-bannaan u fuliyaan. Marka laga soo tago cilmi-baaristooda xogta, waxay tan iyo Abriil la

kulmeen in ka badan 400 qof. Waxay wixii ay barten u adeegsadeen inay ku abuuraan ikhtiyaaro loogu talagalay qorshaha hawlgaaleed ee SACU ee la soo jeediyay.

Maxaa xiga oo dhici kara?

Weaver waxay waddaa gabagabada qorshaha la soo jeediyey. Waxaan doonaynaa inaan qorshahan hordhac ahaan ula wadaagno dadka, qoysaska, mas'uuliyiinta sharciga ah, shaqaalaha, xoogsatada iyo shurakada. Kadib, waxaan qorshaha u gudbin karnaa Golaha Sharci-dejinta annagoo ku lifaaqayna warbixin ku saabsan sida xulashooyinka kala duwan ee qorshuhu u saamayn karaan dadka. Macnahan guud ayaa muhiim u noqon doona Golaha Sharci-dejinta.

Ma hayno waqti ku filan oo aan shaqadan ku dhammaystirno ka hor waqtiga kama dambaysta ah ee Sibtambar 30. **Si aan u hubinno in tallaabadan muhiimka ah la qaado, waxaan Xafiiska Maaliyadda ee Golaha Sharci-dejinta ka codsannay wakhti dheeraad ah oo aan shaqadan ku dhammaystirno.**

Waxaan aad u doonaynaa inaan helno jawaab-celin dheeraad ah oo aan dhammaystirno warbixinta. **Waa kuwan tallaabooyinkayaga xigaa:**

- **Sibtambar/Oktoobar: Waxaan samaynay Guddi La-talin Farsameed.** Guddigu waxay ka kooban tahay shakhsiyaad, qoysas, mas'uuliyiin sharci ah, shaqaale, xoogsato, iyo shurako. Toddobaadyada soo socda, waxaan guddiga isla eegi doonnaa qorshaha iyo talooyinka Weaver. Xubnuhu waxay na siin doonaan jawaab-celin ku saabsan sida ikhtiyaarada qorshuhu u saamayn karaan

xubnaha bulshooyinkooda. Tusaale ahaan, dadka deggan SACU waxay sheegi karaan sida qorshuhu u saamayn karo iyaga. Shaqaaluhuna sidaas oo kale ayay samayn karaan, iyo wixii la mid ah.

- **Nofeembar: Waxaan yeelan doonnaa wadhadallo daba-gal ah,** haddii loo baahdo.
- **Diseembar: Waxaan diyaarin doonnaa warbixin jawaab-celin ah oo ay ku jiraan wixii aan ka helnay TAC. Waxaan dhammaystiri doonnaa qorshaha SACU.**
- **Janaayo 8, 2027: Waxaan Golaha Sharci-dejinta u gudbin doonnaa qorshaha hawlgaleed ee SACU ee kama dambaysta ah iyo jawaab-celinta.**

Mahadsanid

Mar kale waad mahadsan tihiin, dhammaan kuwiina bixiyay jawaab-celin oo qayb ka ahaa qorshaynteenaa. Waxaan rajaynaynaa inaan dhammaystirno qorshaha hawlgaleed ee cusub oo aan xoojinno adeegyadeenna.

Haddii aad qabto su'aalo, iimayl u soo dir sacu.execteam@odhs.oregon.gov.

Nabadgelyo,



Acacia McGuire Anderson, Agaasimaha

[Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka](#)

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon



Winston Brown, Agaasimaha

[Cutubka Xasilinta iyo Dhibaatooyinka](#)

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon

Waxaad dukumintigaan ku heli kartaa si bilaash ah isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad ku dooneyso. Iimayl ku soo dir dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.

Khayraadka/Dhigaallada

- Isku diiwaangeli [wargelinada ODDS](#).
- Wax ka ogow [dhacdooyinka ODDS](#).
- Isku diiwaangeli [wargelinada Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon](#).
- Akhri [farriimo ka socdo ODDS](#).
- Naga soo raac [Facebook @oregondhs.idd](#)